

Muxuu codsaduhu ugu baahan yahay wakiil oggolaansho haysta?

Marka codsaduhu ay awood daro ku dhacdo ama uu dhinto, wuxuu u baahan yahay wakiil oggolaansho haysta si uu u matalo. Sidoo kale, maxkamadu waxay awood u siin kartaa dacwad-oogaha wakiil.

Muxuu wakiilka oggolaanshaha haysta u qaban karaa qofka dacwoonaya?

Markaad tahay wakiilka oggolaanshaha haysta ee dacwoodaha, waxaad samayn kartaa waxyaabaha soo socda:

- Waxaad codsan kartaa faa'iidooyinka qofka dacwoonaya
- Waxaad heli kartaa macluumaadka Fasaxa Xanuunka ee mushaarka lagu helo ee uu diro qofka dacwoonaya
- Waxaad heli kartaa macluumaad ku saabsan dheefaha Fasax Xanuunka ee uu qofka dacwoonaya helay ama heli doono
- Waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan go'aanada rahman ama kuwa la dhameeyay ee laga gaaray Fasaxa Xanuunka ee mushaarka lagu helo qofka dacwoonaya ee Dheefaha Oregon
- Waxaad siinaysaa macluumaadka Fasaxa Lacag-bixinta ee dacwoodaha, oo ay ku jiraan macluumaadka aan u baahanahay si aan u dhamaystirno sheegashada faa'iidooyinka
- Waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aanka Fasaxa Xanuunka ee mushaarka lagu helo ee dacwoodaha iyo dhageysiyo kasta oo la xariira

Maxaan u baahanahay inaan sameeyo si aan u noqdo wakiilka oggolaanshaha haysta ee dacwoodaha haddii uu awood la'aan noqdo ama geeriyo?

Waa inaad:

- Buuxisaa shuruudaha Fasaxa Xanuunka ee mushaarka lagu helo si aad u wakiil uga noqoto dacwoodaha (eeg jadwalka hoose)
- Fahantaa waajibadyadaada wakiil oggolaansho haysta ka ahaan
- Buuxisaa oo aad soo dirtaa foom si aad u codsato
 - Arrintaan waxaa ka mid ah inaan noo soo dirno dukumiintiyada lagama maarmaanka ah si aan u xaqiijino aqoonsigaaga iyo dacwoodaha,

dukumiintiyada lagu xaqiijinayo awood la'aanta dacwoodaha ama inuu dhintay

Fiiro gaar ah: Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad noo soo dirto dukumiintiyada si aad u xaqiijiso xiriirka qoyska.

Sidee ku ogaan karaa foomka la isticmaalayo marka la codsanayo heerka wakiilka oggolaanshaha haysta?

Waxaa jira saddex nooc oo wakiillo oggolaansho haysta ah:

1. Wakiil lagu magacaabay hab dacwad sharci ah
2. Wakiilka oggolaanshaha haysta ee dacwoodaha awood la'aanta ah
3. Wakiilka oggolaanshaha haysta ee dacwoodaha dhintay

Eeg shaxda hoose si aad:

1. U ogaato nooca wakiilka oggolaanshaha haysta ee aad noqon doonto
2. U hesho foomka saxda ah si aad u codsato

Codsaduhu ma yeelan karaa wax ka badan hal wakiil oo oggolaansho haysta?

Maya. Waxaan kaliya aqoonsanaa hal wakiil oo matala halkii dacwoodaha halkii waqtiba.

Waa maxay mas'uuliyadaha ka wakiilka oggolaanshaha haysta ahaan?

Marka aan kugu darno sida wakiilka oggolaanshaha haysta ee dacwoodaha, waxaad qaadaysaa mas'uuliyadaha qofka dacwoonaya ee la xiriira sheegashadooda. Wax kasta oo aad u qabato qofka dacwada qaba waxay hoos imanayaan isla sharciyada Fasaxa Xanuunka ee mushaarka lagu helo ee khuseeya qofka dacwada qaba. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad ku dhaqanto qaab ku habboon danta ugu wanaagsan ee codsadaha (ama hantidiisa). Waa inaad sidoo kale ilaalisaa sirta xog kasta oo sheegasho ah oo aad naga hesho.

	Wakiil Lagu Magacaabo Sifo Sharci ah	Wakiilka Oggolaanshaha Haysta ee Dacwoodaha Awood la'aanta ah	Wakiilka Oggolaanshaha Haysta ee Dacwoodaha dhintay
Yaa wakiil ka noqon kara qofka dacwoonaya?	<ul style="list-style-type: none"> • Qof la siiyay oggolaanshaha awooda qareenimada • La-taliye ama masuul • Wakiilka gaarka ah (fuliye ama maamule) 	<ul style="list-style-type: none"> • Xaaska, lammaanaha guriga, ilmaha ama ilmaha xaaska ama lamaanaha guriga • Waalidka ama lamaanaha waalidka ama lammaanaha guriga • Walaalaha ama xaaska walaalaha ama lammaanaha guriga • Ilmaha adeerada ama xaaska ilmo adeerada ama lammaanaha guriga • Awoodaha/ayeeyada ama lamaanaha awoodaha/ayeeyada ama lammaanaha guriga • Gabadha uu awoowe u yahay ama ay ayeeyada u tahay xaaska ama lammaanaha guriga • Shaqsi kasta oo xiriir la leh marka la eego dhiiga ama qaraabo kasta oo xiriir dhow la leh qofka dacwoonaya waa u dhigma xidhiidhka qoyska 	<ul style="list-style-type: none"> • Lamaanaha nool • Aaminaada inter vivos ee la burin karo (dardaaran nololeed) oo uu abuuray qofka dhintay • Caruurta qofka dhintay • Waalidiinta, wiilasha, iyo gabdhaha walaalaha la ah qofka dhintay

	Wakiil Lagu Magacaabo Sifo Sharci ah	Wakiilka Oggolaanshaha Haysta ee Dacwoodaha Awood la'aanta ah	Wakiilka Oggolaanshaha Haysta ee Dacwoodaha dhintay
Foomkee ayay tahay inaan isticmaalo?	<p>Majiro foom aad buuxineyso. Waa inaad haysataa dukumiinti maxkamadeed oo rasmi ah oo xaqiijinaya awoodaada sharci iyo muddada maamulkaas.</p> <p>Waa inaad xaqiijiso aqoonsigaaga.</p>	<p><u>Foomka Wakiilka oggolaanshaha haysta ee dacwoodaha awood la'aanta ah</u></p>	<p><u>Foomka Wakiilka Oggolaanshaha Haysta ee Dacwoodaha dhintay</u></p>
Goorma ayay oggolaanshaha wakiilnim o dhamaan eysaa?	<ul style="list-style-type: none"> • 30 maalmood gudahood oo laga bilaabaayo taariikhda aan ansixinay xaaladaada, haddii aadan soo dirin codsiga faa'iidooyinka • Maalinta ugu dambeysa ee sanadka dheefaha codsadaha, ama taariikhda ku qoran dukumiintiga rasmiga ah ee maxkamada, hadba kan ugu horeeya 	<ul style="list-style-type: none"> • 30 maalmood gudahood oo laga bilaabaayo taariikhda waaxdu ansixisay xaaladaada, haddii aadan soo dirin codsiga faa'iidooyinka • Maalinta ugu danbeysa ee sanadka dheefaha codsadaha ama ilaa taariikhda aan ogaanay in codsaduhu uusan awood lahayn 	<ul style="list-style-type: none"> • Oggolaanshuhu wuxuu dhamaanayaa 30 maalmood kadib marka aan ansixino xaaladaada, haddii aadan soo dirin codsiga faa'iidooyinka • Maalinta ugu danbeysa ee sanadka dheefaha ee hada ee codsadaha

	Wakiil Lagu Magacaabo Sifo Sharci ah	Wakiilka Oggolaanshaha Haysta ee Dacwoodaha Awood la'aanta ah	Wakiilka Oggolaanshaha Haysta ee Dacwoodaha dhintay
Goorma ayuu maamulka la magacaa bay dhammaa nayaa?	Marka codsaduhu uu dhinto ama maxkamadu ay joojiso mataalada	Haddi awooda qareenka, ilaaliye ama masuulka uu noqdo wakiilka oggolaansho haysta ama Codsaduhu uu dhinto	Haddii codsaduhu leeyahay wakiil gaar ah (fuliye ama maamule) oo ay maxkamaddu magacawday